

2/11/11

Qodobka 3^{aad} farqadiisa 6^{aad}

6. Gudiddu waxay xilka haynayaan muddo laba (2) sano ah oo ka bilaabanta maalinta ay Maxkamada Sare xilka u dhaariso, Madaxweynuhuna waa u cusboonaysiin karaa hadii loo baahdo, iyada oo muddo kordhintaasi cusub laga ansixin doono Gollaha Wakiilada.
 - B. Xubnaha Gudidda waxaa xilka lagaga qaadi karaa habka loo maro xilka qaadista Komishanka Doorashooyinka Qaranka.
 - T. Hadii ay dhacdo mudadii xilka Gudida oo aan dhamaan ay isku mar xubnaha Gudiddu baneeyaan jagooyinkoodii, Gudidda cusub ee la magaacaabaa waxay dhamaystirayaan mudadii xilka ka hadhsanayd.
 - j. Hadii Xubin ka mid ah Gudiddu ay banayso xubnimada Gudidda, Madaxwaynaha ayaa badalkeeda soo buuxin doona, Xubinta cusub waxa ay dhamaysan doontaa muddo xileedka u hadhsan Gudidda.
 - X. Xubinta/naha cusub waxa ansixinayaa Golaha Wakiilada inta aan xilka loo dhaarin.

Qodobka 4^{aad}

Codsashada Diiwaangelinta iyo Qabashada Araajida.

1. Muddada Qabashada codsiyada diwaangelintu waa Shan iyo Affartan maalmood gudahood (45)oo ka bilaabmaysa maalinta la daabaco ama la sii daayo baahinta qabashada codsiyada.
 - 3 (5). waxaa waajib ah in lacagta cashuurtu cadahay in la wadaagey oo aysan ka bixin gacan qudha, waxaana dabagal ku samaynaya Gudidda Diiwaan-gelinta.

Qodobka 5^{aad}

Xisbiyada Qaran iyo Ururada Ku meel Gaadhka ah .

2. Muddada hawlgalada ururada Siyaasadeed waa lix (6) bilood gudahood waqtigana waxaa cayimaya Gudidda Diwaangelinta Ururada Siyaasada iyo Anxisinta Axxaabta Qaranka iyaga oo la tashanaya Gudidda Doorashooyinka Qaranka.
 3. (j). Mudadda liisanka ee Xisbi Qaran waa toban (10) taariikhda liisanka la siiyay.

Qodobka 11^{aad} farqadiisa 4^{aad}

7/1/11

4. Mar kasta oo la furayo tartanka ururada siyaasadda ee G/Degaanka lix bilood ka hor, muddanaha ka tirsan Golaha Wakiilada ama Golayaasha Degaanka waxaa u bannaan inuu furan karo Urur siyaasadeed oo cusub ama uu ku biiri karo urur/xisbi siyaasadeed ee uu doono.

Qodobka 23^{aad} farqad 2^{aad}

Xisaab Xidhka

2. hanti dhawraha madaxa banaan waxaa codsanaya hawlgalkiisa komishanka Doorshooyinka Qaranka ama Gudidda Diiwaangleinta Ururada.

Qodobka 29^{aad}


Khilaafaadka ka Dhasha Xisbi/Urur Dhexdii ama Laba Urur/Xisbi

1. Haddii xubnaha xisbi ama urur isku khilaafaan hogaanka ama u kala jabaan laba meelood iyo wax ka badan, hay'adaha xisbigu/ururkuna xalin kari waayaan khilaafka, waxa dhinicii danaynayaa dacwad u gubinayaa Gudidda Diwaan-gelinta Ururada iyo Ansixinta Axaabta Qaranka.
2. Gudiga diwaan gelintu markuu helo dacwadda ku xusan farqadda 1aad ee Qodobkan, wuxuu ka soo saarayaa go'aan ku salaysan Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axaabta Siyaasadeed ee Xeer Lr 14/2011 iyo dastuurka xisbiga/ururka hogaankiisa laysku haysto ee laga diwaan geliyey Gudidda Diiwaan-gelinta.
3. Dhinicii ku qanci waaya go'aanka gudidda diwaan gelinta waxaa u bannaan in uu racfaan u qaato Maxkamadda Sare, xukunkeeduna wuxuu noqonayaa kama dambays.
4. Haddii dhinacyada is hayaa la yimaadaan laba dastuur oo is khilaafsan oo loo sameeyey ururka/ xisbiga hogaankiisa laysku haysto, waxaa la tixgelinayaa dastuurka laga diwaan geliyey Gudidda diwaan gelinta ee lagu aqoonsaday ururka/xisbiga.
5. Haddii khilaafka farqadaha hore ku qorani yimaado inta aan ururka la diwaan gelin ee aan aqoonsiga la siin, gudidda diwaan-gelintu ma diwaan gelinayso magaca ururka hogaankiisa laysku khilaafay.
6. Dhinacyadana waxaa u bannaan in mid waliba gaarkiisa u samaysto urur kale oo aan la hayn magacii laysku qabsaday.



5. Haddii khilaafka farqadaha hore ku qorani yimaado inta aan ururka la diiwaan gelin ee aan aqoonsiga la siin, gudidda diiwaan-gelintu ma diiwaan gelinayso magaca ururka hogaankiisa laysku khilaafay.
6. Dhinacyadana waxaa u banaan in mid waliba gaarkiisa u samaysto urur kale oo aan la hayn magacii laysku qabsaday.
7. Haddii laba urur ama urur iyo xisbi isku qabsadaan magaca ama astaanta diiwaan-gelinta ka dib, waxaa loo aqoonsanayaa in uu leeyahay magacaas ama astaantaas kan Gudiddu u diiwaan gelisey ama loo hor diiwaan geliyey.

C/raxman Maxamed C/lahi (ciro)
Gudoomiya Golaha Wakiilada JSL



C/risaq Siciid Ayanle

Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL